

## Magangeliyo doone: Waxaad shaqayn kartaa oo kaliya, haddii sharciga shaqo-oggolaanshuhu kuu shaqaynayo



Markaad shaqo hesho, hubi in shaqo-oggolaanshuhu kuu bilaabmay oo isla markaana uu shaqaynayo.

Haddii shaqo-oggolaanshuhu kaa dhamaado, waa in aad isla markiiba shaqo bixiyaha u sheegtaa. Shaqo-oggolaansho la'aan, haddii aad ku shaqayso, waxaad noqon kartaa eedaysane dambi.

### Goorma ayuu shaqo-oggolaanshuhu bilaabmayaa?

Sida tan ayaad u shaqaysan kartaa oo shaqadda mushahar ama magdhow kale ugu qaadan kartaa:

- Markaad sharciga xaraysato, waxaad shaqada bilaabi kartaa 3 bil kadib, haddii aad maamul-dowladeedka u keento baasaaboora ama waraaqo kale oo socdaal oo la aqoonsan yahay oo shaqaynaya.
- Markaad sharciga xaraysato, waxaad shaqada bilaabi kartaa 6 bil kadib, haddii aad keeni waydo baasaaboora ama waraaqo kale oo socdaal oo la aqoonsan yahay.

### Illaa wakhtima ayaad shaqada wadi kartaa?

Markaad go'aanka dalabka magangeliyo-doonkaaga hesho, waa in aad hubisaa in shaqo-oggolaanshuhu weli shaqaynayo.

#### Haddii aad hesho go'aan oggolaansho degaan ah

- Inta badan Finland waad ka sii dhex shaqaysan kartaa.
- In aad Finland ka dhex shaqayn karto, ka hubi go'aanka ama kaarka sharciga degenaanshaha.

#### Haddii aad hesho go'aan diidmo degaan ah

- Xuquuqdaada shaqo-qabashada waxaa ay dhammaanaysaa, marka uu go'aankaagu yahay mid dhaqangalaaya.
- Go'aanka ayaa laguugu sheegaayaa, goorta uu go'aanku yahay mid dhaqangalaaya.
- Ka akhri faahfaahin dheeraad ah bogga internetka ee Xafiiska Imigreeshinka: [migri.fi/kaannyttaminen](https://migri.fi/kaannyttaminen)

Arrimaha ku saabsan shaqo-oggolaanshaha magangeliyo doonaha, ka akhri bogga internetka ee Xafiiska Imigreeshinka:

[migri.fi/turvapaikanhakijan-tyonteko-oikeus](https://migri.fi/turvapaikanhakijan-tyonteko-oikeus)

## Sidee dalabka cusub u saamayn karaa shaqo-oggolaanshaha?

Haddii aad dalab cusub xaraysatay, sida tan ayaad shaqo u bilaabi kartaa:

- Markaad sharciga xaraysato, waxaad shaqada bilaabi kartaa 3 bil kadib, haddii aad maamul-dowladeedka u keento baasaaboor ama waraaqo kale oo socdaal oo la aqoonsan yahay oo shaqaynaya.
- Markaad sharciga xaraysato, waxaad shaqada bilaabi kartaa 6 bil kadib, haddii aad keeni waydo baasaaboor ama waraaqo kale oo socdaal oo la aqoonsan yahay.

Dalabka cusub waa mid magangeliyo lagu doonayo. Waa mid qofka magangeliyo-doonku xaraysto, markaa dalabyadaaddii hore wadadda sharciga maraan oo soo af jarmaan. Waa marka go'aanka sharcigu ku dhaco oo rafcaan-qaadasho dhamaato.

## Shaqo bixiyaha waxa ku waajib ah, hubinta shaqo-oggolaanshaha

Shaqo bixiyuhu waa in uu iska hubiyaa in aad leedahay sharciga degaanta ee shaqaalaha looga baahan yahay ama in aanad sharciga degaansha sidiisaba u baahbayn.

Shaqo bixiyaha waxa lagu eedayn karaa dambi ama ganaax, haddii si oggaan ama dayacaadi ku jirto shaqaalihisa ugu shaqaysto, isagoon loo oggolayn in uu qofkaasi shaqeeyo.

## Sharci ahaan uma baahnid in aad cadayso shaqo-oggolaanta

Markaad magangeliyo doonka tahay xuquuqdaadda shaqadu waxay ku salaysan tahay shaqciga ajaanabiga. Xuquuqdaada shaqo qabasho ama tan shaqaalahaaga waxaad si lacag la'aan ah ku soo weydiin kartaa dhanka iimeylka: <https://migri.fi/todistus-tyonteko-oikeudesta>

Go'aanka Waaxda socdaalka ayaa lagu sheegay, goorta uu go'aanku yahay mid dhaqangalaaya. Booliska ayaa ka mas'uul ah dhaqangelinta go'aanka. Xilhayaha illaalinta ammaanka shaqada ayaa kormeeriya shaqo bixiya, sida uu waajibkiisa illaalin shaqo-oggolaanshahaaga uga soo baxayo: [tyosojelu.fi/tyosuhde/ulkomainen-tyontekija/tyonteko-oikeus](https://tyosojelu.fi/tyosuhde/ulkomainen-tyontekija/tyonteko-oikeus). Markaa arrimahan awgood ayaa shaqo bixiyahaagu ula xiriiri karaa xilhayaha arrinkan oo kale khuseeyo.